



## Maalgelinta daymeed ee xagaaga oo saameyn ku yaalan doonta dugsiyo intii hore ka badan

Waqtigan xagaaga ayaa ballan qaadanaya in uu noqdo barnaamijka dhanka maalgelinta daymeed ee PPS ee ugu weyn ilaa iyo hadda. Mashaariicda casriyeynta iyo wanaajinta dugsigu waxay saameyn ku yeelan doonaan ugu yaraan dugsi kasta bilaha soo socda iyada hawshooda lagu jiro cusbooneysiinta dhanka ammaanka, saqafyo cusub, daaweynta kiimikada asbestos, gambaleelka badbaadada ee dabka sheega oo cusub, wanaajinta ADA iyo cusbooneysiinta qalabka dhul gariirka loogu talagalay.

Intaasi waxaa dheer, dhismaha oo ku bilaabmi doona casriyeynta Dugsiga Sare ee Madison iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg ee cusub oo uu dheer yahay Dugsiga Sare ee Grant ee dhawaan la casriyeyay oo la furi doono bilawga sanad dugsiyeedka cusub.

Saqafka dhul gariirka loogu talagalay oo cusub oo awood leh ayaa laga dhisi doonaa Dugsiyada Hoose ee Sitton iyo Rigler iyo Dugsiga Dhexe ee Jackson. Intaasi waxaa dheer, Rigler iyo Rose City Park oo heli doona wiishash cusub. Shaqada ayaa xagaagan ku bilaabmi doonta cusbooneysiinta qalabka dhul gariirka loogu talagalay ee Dugsiga Hoose ee Hayhurst, ka dhigida in dugsigu noqdo mid nololi ka muuqato marka ay noqoto xeerka dhanka ammaanka ee waxyalaaha dhul gariirka la xiriira. Dugsiga Sare ee Jefferson wuxuu heli doonaa cusbooneysiinta gambaleelka badbaadada ee dabka sheega iyo nidaamyada biyaha wax lagu rusheeyo oo cusub.

Dugsiyada kale ee helaya gambaleelada badbaadada ee dabka sheega waxaa ka mid ah: da Vinci, Community Transition Program at Green Thumb, Jason Lee, Ainsworth, Maplewood iyo West Sylvan. Mashaariicda daaweynta kiimikada asbestos ayaa ka dhici doona Lane, Woodstock, Vestal, Marysville, Beaumont, Rigler iyo Capitol Hill

Sidoo kale waqtiga xagaagan, lix dugsi ayaa heli doona goobo biyaha laga cabo oo kiimikada lead ku yar tahay: Arleta, Duniway, Jefferson, Llewellyn, Rigler iyo Robert Gray. Shaqadan waa barnaamij tijaabo ah oo lagu raadiyo wanaajinta tayada biyaha iyo in lacag loogu badbaadiyo degmada iyada oo la iska ilaalinayo beddelaada tuubooyinka qaaliga ah isla markaana dhibaatada badan ee derbiyada ku dhex yaala.

Shaqada xasillinta rinqiga kiimikada lead ayaa sidoo kale si buuxda u socon doonta xagaagan iyada oo waxyabo la wanaajinayo ay ka dhacayaan 30 goobood. Shaqada wejiga hore ee rinqiga kiimikada lead waxaa xoogga lagu saari doonaa pre-kindergarten ilaa fasallada heerka labaad iyada oo la qorsheeyay in la dhammeystiro dabayaqa qada xagaagan.

Ugu dambeyn, shaqada kooxda u horreysa ee dugsiyo ah ee dhan 26 ay ku helayaan cusbooneysiinta dhanka ammaanka ayaa bilaabmi doonta Luulyo. Shaqada kooxda labaad ee dugsiyo ah ayaa socon doonta dabayaaqada xagaaga, iyada oo kooxda saddexaad ay soo raaci doonaan horraanta waqtiga dayrta, iyada oo dhammaan shaqada la soo gabagabeynayo gu'ga 2020.

Marka laga yimaado mashaariicda dhanka dhismaha, shaqada naqshadeynta ayaa sii socota taasi oo ku saabsan mashruuca dib u dhiska Dugsiga Sare ee Lincoln oo la qorsheeyay in uu bilaabmo 2020 iyo mashruuca casriyeeynta Benson Tech. Dhismaha Benson ayaa socon doona waqtiga xagaaga ee 2021.

Wixii macluumaaad dheeraad ah, booqo [bogga internet-ka ee Maalgelinta Daymeed ee Wanaajinta Dugsiga](#). Wixii su'aalo ah ee kale, la xiriir David S. Mayne Maamulaha Isgaarsiinta Maalgelinta daymeed, [dmayne@pps.net](mailto:dmayne@pps.net).